

Kor-ka-eegis habka cashuurta hantida ma-guuraanka ah oo heer sare ah?

<p>Magaalada Minneapolis Xafiiska Qiimeeyaha ayaa Qiimeeya oo u Kala Saara hantida ma-guuraanka ah mid Gaar ah iyo mid hantiyeed.</p> <p>Marka la eego sharciga gobolka, qiimaha iyo kala sooridda hantida dhulka waxa la sameeyaa laga bilaabo Janaayo 2 ilaa Diisambar 1 sannad kasta. Xafiiska qiimeeyahu wuxu ka shaqeeyaa sannadka oo dhan qiyaasidda qiimaha suuqa ee hanti kasta ee Janaayo 2 ee soo socota. Qiimaynta Janaayo 2nd ayaa ah salaynta cashuurta sannadka soo socda.</p>	<p>Qiimeeyuhu wuxu ku saleeyee qiyaastiisa qiimaha suuqa tilmaamaha hantida ma-guuraanka ah ee saamaynaya qiimaha suuqa sida cabbirka inta uu le'eg yahay, da'da, xaaladiisa, iyo in intiisa hoose dhamaystiran yahay oo ay dheer tahay waxyaabaha u gaarka ah sida dab-shidka kulaalka, musqul dheeraad ah, barax loo baxo iyo arrimo kale.</p> <p>Qiimeeyayaashu waxay ku sameeyaan baaritaan tifatiran iibka xaafad walba si ay u fahmaan sidu suuqu ka yahay meeshaas, oo ay ku jirto iibabka hatida ma-guuraanka ah ee meelaha kale oo la xaqiijiyey. Waaxda Dakhliga ee Gobolka (State Revenew Department) ayaa eegta macluumaadka iibka si ay u hubiso in qiimaha hatida ma-guuraanka ahi ay u tahay xaq oo u qalma.</p> <p>Magaalada Minneapolis waxay u baahantahay in ay ku samayso baaritaan gudo iyo dibedba ah hantidaada ma-guuraanka ah haddii ay tahay dhismo cusub ama aad wax ka beddelayso oo wax ku kordhinayso hantida ama ugu yaraan hal mar shantii sannoba. Haddii aanu xataa qiimeeyuhu kormeerin hatidaada sannadkii mar, qiimaheeda ama qiyaasta laga yaabo in ay ku iibsanto hatidaadu suuqa furan waxa lagu dabiqli karaa hadba sida uu yahay dhaqdhaqaaqa suuqa meeshaas.</p> <p>Qiimeeyuhu wuxu isticmaalayaa habka kala-sooridda ee gobolka u dhigan oo ku salaysan sida aad hantida u isticmaalshay sannadkii tagey (matalann: degaan, gaansci, guri qoysku ku nool yahay ama aanay ku noolayn, guri dabaq ah, beer iwm.)</p>
<p>Dhamaan hantiilayaashu waxay helaan Ogeysiis Qiimaha (Value Notice) ah bisha Maars sannad walba.</p>	<p>Qiimeeyuhu wuxu boostada kugo soo diri doonaa Ogeysiis Qiimaha (Value Notice) ah dabayaaqada bisha Maars sannad walba oo ku bilaabanta qiimaha iyo nooca uu yahay hantida ma-guuraanka ahi oo ku aadan cashuurta hantida aad bixin doonto sannadka soo socda oo weliba muujinaysa qiimahiis sannadkii hore.</p>
<p>Hantiilayaasha oo dhan waxa lagu dhiiri-gelinayaa in ay FIIRSHAAN Ogeysiiska Qiimaha (Value Notice) oo go'ansadaan in ay ogol yihiin ama diidan yihiin qiimaha hatida ee la sheegay.</p>	
<p>Haddii aad diidan tahay macluumaadka ku qoran Ogeysiiska Qiimaha (Value Notice) ...</p>	<p>Ku dhaqaaq inaad wacdo qiimeeyahaaga oo lambarkiisu ku qoran yahay ogeysiiska oo kala hadal waxaad tabanayso. Waxay ku siin karaan macluumaad sida ay ku gaareen qiimaha iyo kala-sooridda ee qiimaynta cusub ee sannadka iyo waxyaabaha kuu furan. Haddii aad aaminsantahay inuu qalad ku jiro, waxaad codsan kartaa inuu qiimeeyuhu dib u fiirsho macluumaadka oo dhan si uu u hubiyo in loo adeegsaday macluumaad saxa ah hab qiimaynta.</p> <p>Waxa kale oo kuu furan inaad tagto shirka Guddigga Racfaanka & Is-leekeysinta ee Magalada Minneapolis (City of Minneapolis Board of Appeals and Equalization) ama Shirka Furar (Open Book Meetings) ee la qabto hal mar bisha Maarso sannad kasta si looga racfaano, faaloodo oo la barto sida ay qiimaynta iyo kala-sooridda ku gaareen sannadka cusub qiimayntiisa. Haddii aad dareensantahay in qalad la sameeyey, ballan ayaad qabsan kartaa si dib loogu fiirsho macluumaadka loo adeegsaday qiimaynta.</p> <p>Haddii aanad aaminsanayn inaad ku gadi karin hantida ma-guuraanka ah qiimaha uu qiyaasay Qiimeeyuhu, waxa jira siyaabo kale oo loo racfaani karo.</p> <p>Matalan, waxaad qabsan kartaa qiimeeye gaar ah oo hantida ma-guuraanka ah si uu u dhameeyo qiimaynta hantidaada oo ugu gudbiyo Magaalada si ay dib u fiirshaan.</p> <p>Waxa kale oo aad ka fekiri kartaa racfaan aad u dirto Maxkamadda Cashuurta ee Minnesota (Minnesota Tax Court).</p>

Talaabada labaad waxay tahay **dhamaan hay'adaha dawladda hoose oo dejinaya miisaaniyadooda** – oo ay ku jirto qadarka ay u baahan tahay degma dugsiyeedku, Magaalada Minneapolis iyo degmooyinka kale ee leh cashuurta gaarka ah, sida Guddiga Magaalo-weynta (Metropolitan Council).

Dawladdaha Hoose waxa sharciyan looga baahan yahay inay qabtaan shir dadweyne oo cadeeyaan inta ugu badan ee ay ku kordhinayaan cashuurta hantida ma-guuraanka ah ee ay qorshaynayaan sannadka soo socda.

Wada-xaajoodkaasi waxay inta badan dhacaan dabayaaqada **Ogost ama horaanta Sibtambar**, waayo hayadaha dawladda hoose ayaa la rabaa in ay footeeyaan oo dhigaan inta ugu badan ee la kordhin karo ka hor **badhtanka Sibtambar**.

Cashuur dejintu waxay ku dhamaan kartaa inay ka yaraato intii lagu dhawaaqay laakiin kama badan karto.

Hay'adaha dawladdaha hoose sida degmo dugsiyeedka iyo Magaalada Minneapolis – waxay ka shaqeeyaan miisaaniyadda sannadka xilliyada **dayrta iyo gu'ga** ee sannadkii hore.

Haddii aad danaynayso miisaaniyadda dawladda hoose ama sida loo isticmaalo lacagtaada cashuurta, waa inaad fiirisaa taariikhaha iyo meelaha lagu qabanayo dacwadaha iyo shirarka dadweynaha oo la xiriirtaa awoodda cashuurta in ay ka qayb galaan habka miisaaniyadda. Waxa kale oo intaa dheer in laga yaabo inaad rabto inaad tagto hawl gal miisaaniyadeed ama fadhi qorshe miisaaniyadeed ee hayadaha dawladda hoose.

Marka ay dawladdaha hoose dhameeyaan dhegaysiga miisaaniyadda, waxa miisaaniyadda baahideeda ay qorsheeyeen loo gudbiyaa si loo ansixiyo.

Mid kasta oo ka mid ah miisaaniyadda hayadaha dawladda hoose waxa ku jira qayb u qondaysa in gaar ah oo ka mid ah kharasha lagu wado hawsha (siinta dadka meesha ku nool barnaamijyo iyo adeegyo) dejinta cashuurta hantida ma-guuraanka ah, ama wadarta ay xubinta dawladdu ay u baahantahay si ay u bixiso dhaqdhaqaaqeeda sannadka danbe.

Xafiiska Qiimeeyaha Magaaladu wuxu diyaariyaa **xisaabta qiyaasta cashuurta hantida ma-guuraanka ah** ee hanti kasta ee Magaalada Minneapolis ee sannadka soo socda. Qadarkaasi ma aha wax macne ahaan u jira. Qadarkaasi waa shaqo xisaabeed oo kombiyuutar iyo shaqaale waayo-aragnimo lihi ay soo dhameeyeen oo dib u hubiyeen.

Marka miisaaniyadda la soo qorsheeyey ee hayad kasta oo dawladda hoose ah loo dhameeyo, **Bayaanada Cashuurta la Qorsheeyey (Proposed Tax Statement)** ama sida badi loo yaqaan bayaanada **Runta ku jirta Cashuurta (Truth-In-Taxation)** waa la daabacaa oo boosta loogu diraa qof kast aoo hanti ma-gurrin ah ku leh Magaalada Minneapolis **10 Noofambar** ka bacdi ama **25 Noofambar**.

Bayaanada Bayaanka Cashuurta la Qorsheeyey (Proposed Tax Statement) ma ah biil, waa ogeysiin siday isku bedelayso cashuurta hantidaadu haddii ay dhamaan hayadaha wax cashuura oo dhammi ogolaadaan isbeddelka qadarka cashuurta hantida ee ay hadda eegayaan. Bayaanku wuxu qorayaa qadarka sannadkan iyo qadarka la qorsheeyey si loo darso. Bayaanadaasi waxa kale oo ay qorayaan waqtiyada iyo meelaha ay jiraan **shirarka "Runta ku jirta Cashuurta (Truth in Taxation)"** ee ay qabtaan sannad walba dawladda hoose oo kastaa si ay ugu fidiso dadweynaha marin kale oo ay kaga faaloodaan qadarka cashuurta hatida ee la qorsheeyey.

Shirarka sannadlaha ah ee Runta ku jirta (Truth in Taxation) cashuurta waa fursadda ugu danbaysa ee saamaysa go'aanka saraakiisha dawladda hoose ee miisaaniyadda sannadka soo socda oo ay ku jirto qadarka cashuurta hantida ee ay aaminsan yihiin in loo baahan yahay si loo bixiyo barnaamijyo iyo adeegyo.


Talaabada ugu danbeysa ee hanaanka miisaaniyaddu wuxu dhacaa maalmo dhexdood **Diisambar 20^{ka}** sannad walba. Dawladdaha hoose waa inay ansixiyaan miisaaniyadda kama-danbaysta ah ee sannadka soo-socda **Diismabar**, oo gudbiyaan macluumaadka dhaqaale ee la isticmaalay markii la diyaarinayey xisaabaadka cashuurta ee kama danbyasta ag.

<p>Bayaanka Cashuurta Hantida Ma-gurranka ah (Property Tax Statement) ee “dhabta” ah – aan ahayn mid qorshaysan weli – waxa boosta loogu diraa qof kasta oo hantiila ah dabayaqada Maarso hantida cashuurteeda la bixinayo sannadkaas.</p>	<p>Fiiri: Bayaanada hantida guryaha furfurma waxa boosta lagu diraa Maayo.</p>
<p>Badi hantiilayaasha ma-guuraanka ah, cashuur bixintu waxay ugu egtahay laba dhiibitaan mid ah 15 Maayo iyo mid ah 15 Oktoobar.</p>	<p>Dadka deggan degmada Hennepin waxay adeegsan karaan habab dhawr ah bixinta cashuurta hantida ma-guuraanka ah. Fadlan isticmaal xiriirkan si aad wax badan uga barato waxyaabaha kuu furan: http://www.co.hennepin.mn.us/</p> <p>Taariikhaha kale ee la baxsho cashuurta: Ka fiiri warbixinta cashuurta hantida ma-guuraanka taariikhaha ay ku egyihiin ee ku xusan Warbixinta Cashuurta Hantida (Property Tax Statement), qaybta danbe ee cashuurta waxa la bixin karaa Noofambar 15 dhul beereedka. Cashuurta hantida guryaha furfurma waxay ku egyihiin Ogost 31 iyo Noofambar 15.</p>
<p>Bogga internetka ee Degmada Hennepin ayaad isna ka heli kartaa macluumaad badan xagga qiimaha hantida, sharaxaad iyo cashuurta hantida. Xiriirka qoraalka sare ayaa toos geynaya qaybaha ku haboon. Bogga Degmada Hennepin waxa laga helaa: http://www.co.hennepin.mn.us/</p>	

Racfaanka Qiimaynta Hantidaada Ma-guuraanka ah

Maxaa ii bannaan haddii aanan ogolayn qiimaynta cashuurta hantida ma-guuraanka ah?

Markaad dhugato **Ogeysiiska Qiimaha ee aad sannad walba hesho Maarso** ee aad ogolaan weydo qiimaynta hantida iyo meelaynta waxaa kuu furan siyaabo dhawr ah oo aad ku racfaanto. Siyaabaha racfaanku waa kuwa lagu soo koobay hoos.



Ku-noolaanshaha Guriga Hantida ah

Maxay dadku u dalbadaan meelaynta ah guri lagu nool yahay?

Guri-ku-noolaantu waa barnaamij lagu yareeyo cashuurta hantida oo u furan dadka deggan Minnesota. Gobolka Minnesota wuxu ku dhiirrigeliyaa dadka guryaha leh siinta cashuurta hantida ee jaban kuwa deggan hantidooda. Matalan Meelaynta Guri-ku-noolaantu waxay dhintaa cashuurta guriga lagu nool yahay ilaa \$304 sannadkii.

Waa maxay macnaha lahaanshuhu?

Waa inaad haysato sharci lahaasho oo ku siinaya magaca hantida oo caddeynaya lahaanshaheeda. Si loogu garto warqad lahaansho oo sax ah, warqadda lahaanshuhu waa in laga diiwaangeliyo Diiwaangeliyaha warqadda Lahaanshaha ee Degmada Hennepin (Hennepin County Registrar of Deed).

Kumaa heli kara faa'iidadan?

Haddii aad leedahay hanti dhul **adigu**, ama sharciyan qof qoyskaaga ahi ku noolyahay hantida **Diisambar 1**, waad dalban kartaa heerka guri-ku-noolaanshaha.

Waa maxay macnaha deganaantu?

Adiga iyo dhamaan hantiilayaashu waa inay u isticmaalaan hantida gurigooda rasmiga ah- ama haddii si kale loo yidhaa, waa inaad ku nooshihiin meeshaas. Ku jirista ku-meel-gaadhka ah looma arko wax ku filan in laga dhigo guri lagu noolayahay. Haddii hal qof in ka badani ay leeyihiin hantida oo aanu midna ku noolayn hantida, hantida waxay helaysaa qayb meelaynta guri ku noolaanshaha.

Goorma ayaan soo dalban karaa?

Waa inaad xeraysaa dalabka sida ugu dhakhso badan kadib markaad iibsato ama u wareegto gurigaaga. Haddii aad iibsato oo aad gasho guri aan ahayn hanti lagu nool yahay ka hor Diisambar 1^{da}, oo aad dalbato ula-dhaqan ah guri lagu nool yahay ka hor Diisambar 15, marka meelaynta heerka guriga lagu nool yahay waxay bilaabmaysaa sannadka xiga. Marka la oggolaado meelaynta guri-lagu-nool yahay, gurigaa lagu nool yahay wuxu noqon doonaa hantida ilaa ay is-beddalayso lahaanshaha hantidu, ama ay is-bedesho ku-jiristu ama la iibiyo handida.

Maxaa dhacaya haddii aan iibiyo hantida?

Haddii waqti uun la iibiyo hantida ama aad bedesho guriga rasmiga ee aad ku nooshahay,sharciga gobolku wuxu rabaa inaad ogeysiiso Qiimeeyaha Magaalada 30 beri gudahood. Haddii aad ogeysiin weydo qiimeeyaha 30 beri gudahood waa inaad bixiso cashuurta lagu leeyahay hantida eek u salaysan meelaynta sax ah iyo ganaax.

Qof ehel ihi ma iigu noolaan karaa hantidayda?

Haa, ehelka u qalma wuu noqon karaa beddelka ku-jiritaanka hantilaha. Ehelka u qalmaa waxay yihiin dhalasho, qof aad sharciyan soo korsatay, ama guur. Macnaha "ehelka hantiilaha" waxa ku jira ilmaha, ilamaa qofkaad is-qabtaan dhalay, inanta ama wiilka aad soddog u tahay, seeddi, eddo, habaryar, ama walaalka, awowoga iyo ayeeyada, willama gabr walaalkaa dhalay iyo xubnaha qoyska iskaashatada beerta ama danwadaagta.

Xadaynta:

1. Faa'iidada cashuurta guriga lagu nool yahay ee uu ku jiro ehelku waa in aanay ka badan faa'iidada uu heli lahaa hantiiluhu haddii uu ku noolaan lahaa.
2. Hantida ku meelaysan meel xilli uun lagu raaxatysto waa inuu ku jiraa hantiiluhu ilaa afar sannadood intaan laga meelayn guri lagu nool yahay.
3. Midna hantiilaha iyo ehelkaba ma sheegan karaan soo noqosho cashuurta hantida ee ah hanti lagu nool yahay, haddii aanu ehelku wax ku lahayn hantida.

Maxaa dhacaya haddii aan ku dhaqmi waayo xeeka guriga lagu nool yahay oo been ku biixino guri lagu noolyahay?

Been-ka-sheegidda guri lagu nool yahay waa ciqaab xadhig oo aan ka badnayn hal sanno ama bixin takhsiiir aan k badnayn \$3,000, ama labadaba.

Haddii aan qiimeeyaha la ogeysiin 30 beri gudahood in hantida la iibiyey ama aan si rasmi ah loohu noolayn, meelaynta guri-lagu-nool yahay waa laga qaadayaa oo gaanax la saarayaa.

Sidee ayaan u dalbadaa meelaynta guri-lagu-nool yahay?

Hantilayaasha cusub ee Magaalada Minneapolis waxay ku xerayn karaa guri-lagu-noolaanshaha boosta , fax ama qof ahaanba ka dib markay u guuraan gurigooda cusub. U sheeg Qiimeeyaha magaalada inaad leedahay hanti oo

aad adiga ama ehelkaaga u qalmaa deggan yahay hantida. U gee Qiimeeyaha magaalada dokumenti taageeraya sheegashadaada. Waxaad ku dilban kartaa boosta, fax ama qof ahaan.

Codsashada Guri-lagu-noolaanshaha qof ahaan, boosta ama fax:

Cinwaanka iyo dariiqa:

City of Lakes Building
309 2nd Av S Room 100
Minneapolis, MN 55401-2234
Ama fax ku soo dir: 612 673-3538

Hantiile ahaan, waxad u baahan tahay inaad keento nuqulada soo socda:

- Warqad lahaasho oo damaanad leh, heshiis lahaasho ama shahaadadda "Torrens title" iwm. Si aad u caddayso lahaanshaha hantida
- Nuqul Shahaadada Qiimaha hantida (Certificate of Real Estate Value-CRV), oo cadaynaysa in dokumentiyadan la geliyey Diiwaan-geliyaha Waraaqaha Lahanshaha.
- Lambarka Social Security ee hantiilayaasha ama lambarka aqoonsiga cashuur-bixiyaha (Individual Taxpayer Identification Number-ITIN) ee hantiile kasta ama ehelka u qalma sida shrciga gobolka sheegayo.
- Taariikhda dhabta ah ee ay soo degganuhu u soo guuray hantida waa wax looga baahan yahay guri-lagu-noolaanshaha.
- Lambarka Telefonka maalintii ama macluumaadka xiriirka haddii lagaga baahdo su'aalo marka la maaraynayo dalabkaaga.

Hadaad tahay ehel u qalma oo dalbanaya guri-lagu-noolaanshaha hantida, waxad u baahan tahay inaad gudbiso macluumaadka sare iyo foomka dalabka la xiriira ee dokumentiyadan:

- Nuqul waraaqaha dhalashada ee muujinaya ehelnimada qofka ku nool iyo hantiilaha, shahaadad guur, waraaqo korsiiimo, xukun maxkamadeed iyo wixii dokumenti ah ee muujinaya xiriirka ka dhaxeeya qofka ehelka ah iyo hantiilaha.
- Ruqsadda wadista baabuurka ama ID Gobo lee ehelka ku nool hantida oo muujinaya cinwaanka hantida
- Haddii la codsado, wixii dokumenti kale eel agama maarmaan ah

Kadib marka ay waaxdayadu hesho dokumentiyada lagama maarmaanka in lagu maareeyo guri-ku-noolaanshaha, ayaa dalabka guri-lagu-noolaanshaha la dhaqaajin doonaa oo boosta laguugu soo diri. Markaad hesho fadlan xaqiiji macluumaadka dalabku inay sax yihiin, dabeedna qof kasta oo hantiila ahi waa inuu saxiixaa. Dalka oo saxiixan waa in loo soo celiyaa xafiiska Qiimeeyaha magaalada kahor **Diismabar 15** ee sannadka qiyaasta.

Saxiixis iyo soo-celin la'aan ee dalabka ka hor **Diismabar 15** waxay dhalin kartaa in hantida lagu meeleeyo meel aan lagu noolayn.

Maxaa looga baahan yahay lambarka Social Security?

Inkasta oo lambarada Social Security ay yihiin xog khaas u ah qofka, sida shrciga Gobolka Minnesota, waa in la dhiibaa intaan la bixin dhimista guri-lagu-noolaanshaha. Lambarada Social Security waxa loo isticmaalayaa si loo ogaado in hantiilaha iyo ehelkiisu ay ka dalbadeen gobolka wax mar ka badan guri-ku-noolaanshaha.

Waxaan leeyahay sar guryo ah; ma laga dhigi kara guri-lagu-nool yahay?

Saraha ka badan afar guri iyo waxii ka badan iyo noocyada kale ee hantida ah waxa yaalaa lagu xaddidaa helitaanka guri-ku-noolaanshaha saamiga uu kaga jiro sarta hantiiluhu oo quar ahi.

Mas heli karaan guryaha furfurmaa ka-dhaafidda Guri-ku-noolaanshaha?

Haa, hantiilaha oo keliya ayaa dalban kara. Dokumentiga loo baahan yahay iyo nuqulka shahaadada lahaanshaha ayuu keenayaa.

Ma u qalmaan 'Life Estates' Guri-ku-noolaanshaha?

Haa, maadaama ay ribada "life estate" ka muuqato warqadda lahaanshaha oo uu qofka haya hantida "life estate" uu buuxiyey wixii looga baahnaa Guri-ku-noolaanshaha.

Waa maxay xaalka hanti loo hayo cid in laga dhigu Guri-ku-noolaansho?

Inta badan hantida dadka loo hayaa waa u qalmaan Guri-lagu-noolyahay. Shahaadadda haynta waa in la buuxiyaa

oo uu ogolaado xafiiska Qiimeeyaha Magaalada Minneapolis, ama haynta waa in loo keeno Qiimeeyaha si uu u fiiriyo. Macluumaad dheeraad ah kala xiriir Xafiiska Qiimeeyaha Magaalada Minneapolis 612-673-2382.

Ma jiraan meelaynta Guri-ku-noolaashaha oo gaar ahi?

Haa, dadka indhoolayaasha, laxaadka la', curyaamiinta dagaalka iyo dadka qaar ku jira ciidanka. Tani waa horudhac kooban ee meelaynta 1b ee Guri-ku-noolaanshaha ee dadka laxaadka la'. Macluumaad iyojawaabaha su'aalo gaar ah wac Qaybta cashuuraha Hantida ee Waaxda Dakhliga ee Minnesota :(651) 556-6109 ama 1-800-627-9094, khad gaar ah 6-6109, TDD/TTY adeegsadyaasha: wac Adeegga fariimaha Minnesota 1-800-627-3529; u waco for 800-652-9094, khad gaar ah 6-0335

Kala-saarid Guri-ku-noolaanshaha oo Gaar u ah – dadka Indha-la', laxaadka-la', iyo Curyaamiinta

Minnesota waxay leedahay meelayn Guri-ku-noolaansho gaar ah hantida qofka ah:

1. **Indhoole**, qofka indhahala' iyo xaaskiisa am ninkeeda ama
2. **Rasmi ah ama dhamaan laxaadka la'** ee ay shahaadad siisay hayad dawladeed ama ilaha bixiya dakhliga oo uu buuxiyey qofka ku nool guriga wixii looga baahnaa laxaad la'aanta.

Meelaynta Guri-ku-noolaanshaha dadka laxaadka la' waa ka duwan tahay noocyada kale oo u-qalmideeda qofka iyo xaalka laxaad la'aaneed oo gaar ah. Taas ayaa ka duwaysa Guri-ku-noolaanshaha caadiga ah ee meelaynta lagu baxsho isticmaalka hantida. Taas darteed, Waaxda Dakhliga ee MN waxay ku soo jeedinaysaa in meelaynta laxaad la'aanta oo la socdo qofka laxaadka la' min hanti ilaa hanti kale.

Waaxda Dakhliga ee Minnesota ayaa maamushaa barnaamijka **meelaynta guri-ku-noolaanshaha 1b ee laxaad laawayaasha**. Cashuur-bixiyaha raba meelaynta gaarka ah ee Guri-ku-noolaanshaha laxaad laawayaasha waa inuu **ka dalbado Waaxda Dakhliga ee MN ka hor Oktoobar 1^{da}** si ay uga hirgasho cashuurta hantida ee la bixinayo sanndka xiga. Dalabka iyo wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir Waaxda dakhliga ee MN (651) 556-6087. Runta ku jira cashuuraha iyo bayaanka Cashuurta waxa ka muuqan doona meelaynta haboon ee guri-ku-noolaanshaha.

Barnaamijka cashuur Dhimsta iyo Barnaamijka Cashuur Dhaafidda

Ma awoodi karo bixinta cashuurta, ma jirta hab aan u dhimi karo cashuurta?

Gobolka Minnesota wuxu leeyahay laba barnaamij oo ka dabciya cashuurta cashuur-bixiyaha helay kor-u-qaadis cashuurta oo aadan ama leh meelayn aan ku haboonayn dakhligiisa. Waaxda Dakhliga ee Minnesota ayaa maamushalabada barnaamijba. Foomamka waxa laga helayaa markaad wacdo 651-296-4444 ama aad gasho bogga internetka ee waaxda Dakhliga www.taxes.state.mn.us. Macluumaadbaa laga helayaa marka la waco 651-296-3781.

Muxuu yahay Dhimista Lagu habeeyey dakhliga ee Guri-ku-noolashuhu?

Ujeedada **"Dhimista Lagu habeeyey dakhliga ee Guri-ku-noolaanshuhu"** waa in la hubiyo in cashuurta aanay noqon mid aan ku dheeli tirnayn dakhliga qofka. Waxa jira waxyaabo loo baahan yahay barnaamijkan. Fadhigii xeer-dejinta ee 2001, ee waafaqsan isku dhafnaanta cashuurta hantida, ayaa kordhiyey ugu badnaanta ka soo noqota barnaamijkan oo ka dhigay \$1,590. Dakhli ku xidhan ma jiro barnaamijkan.

- Guryaha aan lahayn cid ku dul nool, xadku waa \$85,210. Xadka dakhliga wuxu lakordhayaa xajmiga qoyska illaa \$101,690 guryaha shanta iyo in ka badn ku dul noolyihiin.
- Waayeelkaama [ku-dul-noolayaasha](#) hantiilayaasha: illaa \$104,740 gurigii ay joogaan shan iyo wax ka badan ku-dul-noolayaasha.

Waa maxay bar-tilmaamayntu?

Barnaamij labaad waa **"Bar-timaamayn"** oo bixiya soo-celin haddii cashuurta ka badato 12% iyo haddii ay kordhintu ay ugu yaraan tahay \$100 tii la baxshay 2005. **Badi hantiilayaasha Minneapolis waa u qalmaan barnaamijkan soo-celinta ah.**

Muxuu yahay Barnaamijka Ka-dhaafidda Waayeelka Cashuurta hantidu?

Baahida aasaasiga ah ee hantiilaha waa inuu ahaado be 65 jir ama ka weyn iyo dakhliga gurigu ka yar yahay \$60,000. Tani waa dhaafid cashuureed ee ma aha dhimid. Cashuurta iyo ribada waa in ay isku-biirasdaan saami aan ka badnayn 5% oo rahamaad la saaro hantida.

Tani waxa weeyaan horudhac Barnaamijka Ka-dhaafidda Dadka Wayeelka ah Cashuurta Hantida. Si aad u dalbato ama jawaab uga hesho su'aalo gaar ah, ka wac Qaybta Cashuuraha hantida ee Waaxda Dakhliga ee Minnesota: 651- 556-6109 ama 1-800-627-9094, khad gaar ah 6-6109, TDD/TTY isticmaalka dhagoolayaasha: wac Adeegga fariimaha ee Minnesota 1-800-627-3529; codso 800-652-9094, extension 6-0335

Sidee buu u shaqeeyaa Barnaamijka Ka-dhaafidda Waayeelka Cashuurta Hantida Ma-guuraanka (Senior Citizen Property Tax Deferral) ah?

Tani ma ah barnaamij lagu dhaafayo cashuurta – waa amaah ka imanaysa gobolka. Cashuurta la dhaafay waxa bixiniaya gobolka oo siinaya degmadaada. Ribo ayaa la saari doonaa amaahdaas. Saamiga ribada waxa la hagaajin doonaa sannadkii, laakin kama badan doonto boqolkiiba 5. Rahamaad ayaa la saari doonaa hantidaada.

Inta aad ku jirto barnaamijkan, ma bixinaysid wax ka badan boqolkiiba 3 inta dakhli soo gasha gurigaaga oo aad u dhiibi doonto cashuurta sannadkii ee hantidaada, inkastaba ha gaadhsiisnaado cashuutaada hantidu dhab ahaan. Gobolka ayaa bixin doona baaqiga. Adiga ama ku dhaxalkaaga leh waa inay dib u celiyaan qadarka lacagta ah ee la dhaafay, ka hor intaan la wareejin lahaanshaha magaca hantida.

Iyada oo qayb ka ah dalabkaaga hore ee ka-dhaafidda, waxa loo baahan yahay in aad keento –adiga oo kharashkeeda qaba- warbixin amaahda hantida lagu leeyahay oo faahfaahsan, rahamaad, xukun ama cashuur hati oo aan la bixin hatidaada ma-guuraanka ah. Haddii aanay waxaasi jirin, waxaad weli u baahan tahay inaadkeento warbixin rumaynaysa xaqiiqadaas. Warbixintaasu waa inay ku taariikhaysnaato laga bilaabo dalabka 30 maalmood gudaheed.

Barnaamijka ka-qaybgalka barnaamijka ka-dhaafidda cashuurtu waa wax iskaa-ah. Haddii aad ka qayb-gasho, rahamaad cashuureed ayaa la saari doonaa hantidaada. Rahamaadaasu waa in la oofiyaa ka hor intaan la iibin hantida. Haddii aad dhimato, dadka dhaxalkaaga leh ayaa oofin doona rahamaada inta aanay yeelan magaca lahaanshaha oo saafi u ah. Waa la laga yaabaa inaad u baahato afhayeen, qorsheeye hantiyeed, ama xubin ka mid ah qoyskaaga intaanad is qorin.

Ayaa u qalma Barnaamijka Ka-dhaafidda Waayeelka Cashuurta Hantida Ma-guuranka ah (Senior Citizen Property Tax Deferral)?

Si aad ugu qalanto barnaamijkan, waa in la dhameeyo shuruudaha soo socda **dhamaan**:

1. Hantida waa inuu leeyahay oo uu ku jiraa qof 65 jir ama ka weyn. Markay arrintu tahay laba qof oo isqaba, labaduba waa inay yihiin ugu yaraan 65 marka la bixinayo ka-dhaafidda. (Guriga lagu noolyahay waxa lagu meelaynayaa guri la deggan yahay ama beeralay, ama waxay noqon karta guri ka mid ah guryo sar ku wada yaal).
2. Wadarta dhan ee dakhliga waa inaanu ka badan \$60,000 taariikhda sannadkii ka horreyey markii ugu horreysay dalabka.
3. Guriga waa in la lahaa oo la degganaa sidii guri lagu nool yahay ugu yaraan qof ka mid ah dadka guriga leh ugu yaraan 15 sanno ka hor sannadka dalabka hore ka hoe.
4. Waa in aanay jirin rahamaad cashuureed oo gobol lama dawlad dhexe ama xukun rahamd saran hantida.
5. Wadarta daynta aan la bixin ee lahaanshaha guriga ama rahamaado saran hantida waa in aanay ka badan boqolkiiba 75 qiyasta qiimaha suuqa ee hantida.

Sidee baan u dalbadaa Ka-dhaafidda Waayeelka cashuurta Hantida Ma-guuraanka ah?

Dalabka waxa laga heli karaa Xafiiska Qiimeeyaha magaalada Minneapolis iyo kahdka internetka ee Waaxda Dakhliga ee Minnesota: www.taxes.state.mn.us . **Dhammaan dalabyada oo in la sameeyo Luulyo 1** si loo dhaafo qayb ka mid ah cashuurta sannadka soo socda. Waxad dalban kartaa sannadka aad noqoto 65 jir, laakiin ka-dhaaid ma helaysid ilaa sannadka ku xiga.

Waa maxay Qaan-dhaafidda Aafadu?

Qaan-dhaafidda noocan ah waxa la siiyaa hantida gaarka ah ee si lama-filaan ama si aan ulla-kas ahayn wax u gaadheen ee dhismaha ilaa 50% ama ka badan wax noqday ee ay hantidu noqotay meel aan lagu noolaan karin ama la isticmaali karin. Hantiilaha leh guri uu ku nool yahay ama aanu ku noolayn wuu dalban karaain laga dhimo qaradrkaas cashuurta hantida ee uu bixin lahaa sannadkaas aafadu dhacday.

Qadarka la dhimayo waxa lagu xisaabinayaa adeegsiga tirade bilaha aan hantida lagu noolayn ama la isticmaalin. Dabeedna qadarka qiimaha ka soo baxa dhiska ayaa lagu dhufanayaa cashuurta saafiga ah. Ugu danbeynta, jajabka (tirade dhamaan bilaha aan lagu noolayn hantida oo loo qaybiyey 12) ayaa lagu dhufanayaa waxa ka soo baxa.

Matalan: Guri qiimahiisu suuqu yahay \$100,000 iyo cashuur saafi ah \$3,000 ayaa dab wax gaadhsiiyey Luulyo 10, 2003 markaasu noqday meel aan lagu nool karin ilaa Noofambar 7, 2003. Dhiska qiimahiisu waa \$75,000 waxanu keenayaa saami dhan 75%. Tan ayaa lagu dhufanayaa cashuurta saafiga ah \$3,000. Markaas \$2,250 oo cashuurta ah ayaa noqonaysa dhiska. Tiradan lacagta ah oolagu dhufata jajabka ah 3/12, oo ah tirade dhamaan bilaha uu cashuur bixiyuhu awoodi kari waayey inuu deganaado hantidaas, ayaa waxay siinaysaa in laga dhaafo \$562.50.

Sidee baan u dalbadaa qaan-dhaafidda aafada?

Ugu horreyn wac Xafiiska Qiimeeyaha Magaalada Minneapolis si aad u ogeysiiso dhaawaca gaadhay dhiska. Si aad u maarayso Qaan-dhaafidda Aafada Gaarka ah ee Dagmada Hennepin, **waa inaad** dhamaysaa buuxinta dalabka oo ku celisaa xafiiska Qiimeeyaha Minneapolis. Taasi waa inay dhacdo sida dhakhso ah ee ugu badan kadib markuu dhacay dhaawacu. Waxa kale oo dheeraad ah in ay daruuri tahay inaad haysato nuqul warbixinta caymiska markaad hesho. Ugu danbayn waa inaad la xidhiidho Xafiiska Qiimeeyaha Magaalada Minneapolis marka la dhameeyo shaqada ee laga dhigo hantida meel lagu noolaan karo ama la iibiyo hantida.

Taariikho Muhiim Ah Oo Tilmaamaya Cashuurta Hantida Ma-guuraanka ah

Jannaayo	<ul style="list-style-type: none"> • Jannaayo 2- Taariikhda qiimaha hantida iyo kala soocidda la sameeyo ujeedada oo ah qiimayn.
Febraayo	<ul style="list-style-type: none"> • Ogeysiiska Qiimaha ayaa boostad lagu diraa Febraayo ama Maarso.
Maarso	<ul style="list-style-type: none"> • Warbixinta cashuurta Hantida ayaa boostada lagu diraa dabayaaqada Maarso. • Magaalada Minneapolis waxay qabataa shirarkeeda furan.
Abril	<ul style="list-style-type: none"> • Haddii qiimaynta aad rabto inad ku racfaanto Guddiga Magaalada Minneapolis ee Racfaanka iyo Is-leekaynta, ballan waco. • Abril 30^{da} waa ugu-danbeynta loo gudbin karo racfaanka Maxkamadda Cashuurta ee Minnesota (Minnesota Tax Court).
Maayo	<ul style="list-style-type: none"> • Maayo 15 – Waxa taagan ½ hore ee bixinta cashuurta sannadka. • Haddii qiimaynta aad rabto inad ku racfaanto Guddiga Degmada Hennepin ee Racfaanka iyo is-leekaynta, waco ballan. • Warbixinta guryaha furfurma ayaa boosta lagu diraa.
Luulyo	<ul style="list-style-type: none"> • Luulyo 1^{da} – Waxa taagan Dalabka barnaamijka Cashuurta laga dhaafo dadka waayeeelka ah.
Ogost	<ul style="list-style-type: none"> • Ogost 31^{da}- Guryaha furfurma ½ hore ee cashuur bixinta sannadka ayaa taagan.
Sibtambar	
Oktobar	<ul style="list-style-type: none"> • Oktobar 1^{da}- Dalabka guri-ku-noolanshaha ayaa taagan ee meelaynta gaarka u ah dadka indhoolayasha, laxaadka la' ama curyaamiinta sida Waaxda Dakhliga ee MN ay tibaaxayso. • Oktobar 15- waxa taagan ½ labaad ee bixinta cashuurta sannadka.
Noofambar	<ul style="list-style-type: none"> • Warbixinta cashuurta hantida ama warbixinta Runta ku jirta cashuurta ayaa boosta lagu diraa. • Noofambar 15 – hantida beeraha bixinta cashuurta sannadka ½ labaad ayaa taagan. • Noofambar 15 – Guryaha furfurma bisnta cashuurta sannadka ½ labaad ayaa taagan.
Diisambar	<ul style="list-style-type: none"> • Hayadaha dawladda hoose ayaa ogolaada miisaaniyadda kama-danbeysta ah. • Diismabar 1^{da} – Lahaanshaha iyo degnaanshaha u baahan u-qalmidda meelaynta ku-noolaanshaha cashuurta sannadka danbe. • Diisambar 15 – maalinta u danbaysa dalba meelaynta ku-noolaanshaha ee cashuurta sannadka danbe.